Erayga iyo Maanta Somtwt 0072
Ayidaadda

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Ayidaadda**.

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka marka aynu ka hadlayno mawduucan xiisa leh ee ku saabsan **Ayidaadda** ee uu inoo qaadaa dhigi doono Bawlos. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

SONG: REEL—CUT—

Idaacadda caawa waxaan ku soo qaadanaynaa tusaale, marka hore, kuwo badan oo idinka mid ah oo Masiixiyiin ah, waa Masiixiyiin aqbalay in Masiixu yahay Badbaadiyahooda. Sidaad og tahayba siliciisii, dhimashadiisii iyo sarakiciddiisiiba waxay kuu keentay ama ku siisay hadiyadda Nolosha Daa'imka ah.

Waxaad rumaysan tahay, kukalsoon tahay, oo ku dheggan tahay rumaysadkaas noloshaada oo dhan. Haddii haddaba aan sidaas rumaysan nahay, maxaa keenay in sida badan kiniisadaha masiixyiiinta lagu arko sida inaan lagu dhiiranaanin rumaysadka Masiixa?

Waxaa sabab u ah in kiniisadaha qaar aanay weji furan martida ku soo dhowayn. Qaarkood ma jecla in dad cusub ku soo biiraan kiniisadahooda, qaarna diyaar uma ahan inay koraan, oo u go'aan hawlaha kiniisadda.

Qaarna loollanka cusub ayaanay diyaar u ahayn. Kuwana dooni maayaan wax isbeddel ah. Waa maxay asbaabta kiniisado badan oo masiixiyiin ah looga helo dad ku murma mashaariicda dhismaha, maaliyadda, iyo waxbarashada ee ay kiniisaddu hirgalinayso? Dagaalkan ayaa ka idlaynaya xooggii ruux ahaaneed ee ay lahaayeen dadka muuminiinta ah.

Waa wax laga xumaado markii masiixiyiintu ay dhexdooda ka dagaallamaan, beddelkii ay oran lahaayeen aan dadka badsanno, oo Ilaah baa na hoggaamiye, aan wax magaca Ilaah ammaan u keenaya samayno. Mawduucaas waxaa loo qaabilayaa sida shuqulka wanaagsan. Waxay kaloo isku dhiirigalin lahaayeen”

Haddaba,waxaan leennahay aynu wax un u samayno ammaanta Ilaah. Waxaannu garanaynaa inaan nahay dad badbaaday oo masiixiyiin ah. Waxaan garanaynaa inaan haysanno hadiyadda badbaadda, balse haatan aynu caddayno inaan nahay dadkii Ilaah. Haddaba aynu ku xoogaysanno oo ku korno rumaysadkayaga, oo wax badan u qabanno Sayidka, si Magaciisu u ammaanmo.

Aan dad badan soo gelinno boqortooyada. Hadiyad waliba, awood waliba, baraka waliba, iyo hanti kasta ee aan haysanno waxaa ina siiyey Ilaah si aynu ugu isticmaalno ammaantiisa. Markii qofku garto waxa ay tahay inay boqortooyada Ilaah ka qabtaan, oo qofba kan kale gacanta qabsado iyagoo isku niyad iyo qalbi ah, wax waliba ee sameeyaan way u hirgalayaan.

Aalaaba boqolaal qof ayaa isku yimaada oo heshiis ah waxayna samaystaan wehelnimo ay Ilaah ku amaanaan, waa markii ay gacanta is-qabsadaane. Waxaa jira haddaba kiniisado dhowr boqol oo qof
ay ku cibaadaystaan iyo kuwo kumanaan qof ay ku cibaadaystaan. Haddaba ma qiyaasi kartaa marka tirsiga intaa la’eg ay kulmaan waxa Ilaah ka rajaynayo markii ay bilaabaan inay Ilaah u adeegaan? Wax weyn baa halkaas ka soo baxaya iyo kobocii lagu arkay wakhtigii bilowgii Kiniisadda Axdiga Cusub! Jameecooyinka kulma ee wada barta kitaabka waxaa bilaabay Rasuul Bawlos markii uu dadka wax ku barayey magaalooyinka Korintos iyo Efesos.
Bal ka fakar dadkii xilligaas sidii dadaalka lahayd ee ay Ilaah ugu adeegayeen. Waa sida maanta laga doonayo jameecada masiixiyiinta ah; waxaase nasiibdarro ah inay kiniisadda ku jiraan dad ay la tahay inay Ilaah u go’een, marka ay xaqiiqo ahaan aanay Ilaah u go’in. Waxaa khiyaaneeya shayddaanka. Waxay la tahay inay laba Sayid u shaqayn karaan.
Qorniinkuna taas wuu ka hadlay, oo waxaa laynoo sheegay inaanay suuragal ahayn in qofi u shaqeeyo laba Sayid. Ilaah marnaba niyad qabya ah looguma shaqeeyo. Isagu ma oran mar iyo labo aan hawshiisa qabanno. Wuxuu fahamsan yahay inaan doonayno inaan shaydaanka u adeegno iyo inaan dunidan qayb ka ahaanno.

Ilaah wuxuu leeyahay, Maya, taasu ma suurowdo oo tanaasul laga geli maayo. Maaddaama aan wadaad ahay waxaan fahamsanahay inay jiraan masiixiyiin aan xoog badan lahayn, iyo kuwo itaalkoodu korayo, laakiin aan wakhti u baahan inay koraan. Waxay ku cusub yihiin rumaysadka, oo mararka qaar khaladaad ayey sameeyaan, oo dembi ayey ku dhacaan. Mararka qaar wax waliba ayey samaynayaan, oo waxay gaaraan heer ay dadka ula muuqdaan sida inaanay masiixi ahayn.

Waxaan markaas fahamsanahay ahmiyadda ay leedahay in dadka itaalka daran xaga ruuxa in mar waliba lala joogo, oo xaaalkooda la ogaado, oo la dhiirogeliyo. Waa khasab inay xagga ruuxa ka koraan oo xoogaystaan. Dhiirrogelintu waa muhiim, waana arrin looga baahan yahay kiniisadaha Masiixa.

Waa sida doonida ulaha lagu kexeeyo, oo qof walibana uu ulaha wareejinayo, si doontu u dhaqaaqdo. Taasoo loola jeedo in la lahaado aragti mid ah, oo qof waliba ka qayb qaato hawlaha meesha uu kaga soo aado, si wax un u qabsoomaan. Waxaan rumaysanahay in marka hore dadka la xusuusiyo in Ilaah doonayo in si buuxda laysugu dhiibo Isaga. Mase ahan in qayb noloshaada ah aad Ilaah siiso, waa in adiga oo dhan aad Ilaah isku dhiibto, taas ayaa la doonayaa.

Maahan inaad isku kala qaybiso saddex qayb oo aad tiraahdo, xagga kharashka ayaan hawlaha Ilaah uga qayb qaadanayaa, ama xagga mashaariicda, ama dhanka maamulka. Maahan oo keliya inaad maalinta Axadda u hurto noloshaada ruux ahaaneed. Tan naxdinta leh waxay tahay, inaadan Ilaah u go[in—welibana, aad u go’do wax aan qiimi u lahayn xagga noloshaada ruux ahaaneed.

Tusaaleh ahaan, dadka qaar ayaa waxay go’aansadaan ciyaaraha la socdaan, oo subaxda hore ee Axadda ay soo ciyaaraan. Marka maxaad samaysay, ma Ilaah baad caabudaysaa mise ciyaar baad tegaysaa? Wakhtiga xagaaga, oo dadku jecel yihiin inay ciyaaraha ka qaybqaataan, ayaa lagu qiyaasaa inay tahay 15 ilaa iyo 20 usbuuc. Waxaad kala dooranaysaa inaad Ilaah caabuddo iyo inaad ciyaaraha doorato. Maxay kula tahay oo aad ka malaysan kartaa Ilaah.

Runta aan isku sheegno, waxaan filayaa inaadan ka mid ahayn kuwa aaminsan inay Ilaah caabudi karaan iyagoo kaluumaysanaya, ama ugaarsi tegaya. Dadku waxbay kala garanayaan, waanay og yihiin in taasu aanay suuragal ahayn, waa marka qofku isagoo kaluumaysanaya uu leeyahay, Ilaahna waan caabudi karaa.

Dabcan Ilaah meel waliba waad ku caabudi karta, laakiin taasi maahan waxa aad doonnida u aadday. Doonnida waxaad u aadday inaad kalluumaysato, laakiin maahan cibadaysi—halkaana u tegi maysid in aad jameeco wanaagsan oo aad wax wada caabudaan ka helayso. Go’aan gaar, oo dhen wax faa’iida ah iiguma jiraan cibaadaysi. Caddayso bareerahaaga oo been ha sheegin.

Daacad-darrada aad Ilaah kula dhaqmayso waxay saamanaysaa ilmahaaga, carruurtaada, deriskaaga, iyo saaxiibbada aad isku jameecada tihiin. Is weyddiiya qaarkeen ma u go’nay shaqada, mise weli daacaddaro ayaa jirta? Waxaad kaloo isweyddiin kartaa, maxaan barako u la’ nahay? Ma waxay ka macne tahay inaynaan Ilaah u go’in? Waa maxay sababta bakhaynimada ka dhex jirta wehelnimada ama jameecada?

Ma waxay ka macne tahay inaan sheekooyin kale ku jirno? Mise Noloshayada iyo mashaariicda aan wadno ayeynaan Ilaah ugu kalsoonayn? Mise waxa barakada loo waayey ayaa waxay tahay inaan isla nahay kuwa wanaagsan, marka weliba aan Ilaah si bakhiilnimo ah wax u siinayno? Waa inaan nafsaddeenna daacadnimo kula dhaqanno, oo akhrinno dhowr aayadood oo ku saabsan Shuqulka wanaagsan. Bal aan la soo kala baxno kitaabkii rasuul yacquub 5:14-18, waxaana qoran sidatan:

“Maray tartaa, walaalayaalow, haddii nin yidhaahdo, Rumaysad baan leeyahay, laakiin aanu shuqullo lahayn Rumaysadku ma badaabin karaa isaga/ Waaal wiil ah ama walaal gabadh ah hadday arradan yihiin oo cuntadii maalinta u baahan yihiin, oo midkiin ku yidhaahdo iyaga, Nabad gal, diirsada oo dherga, oo waliba aydnaan siin waxa jidhku u baahan yahay, maxary tartaa?”

“Haddaba sidaas oo kale rumaysadka haddaanu shuqullo lahayn keli ahaantiisu waa meyd. Laakiin waxaa la odhan doonaa, Adigu waxaad leedahay rumaysad, anna waxaan leeyahay shuqullo. I tus rumaysadkaaga aan shuqullada lahayn, aan rumaysadkayga shuqulladaydaan kugu tusi doonaa.”

Rasuul Yacquub sida ay tahay ayuu wax inoogu sheegay, oo wuxuu leeyahay, haddii aadan lahayn shuqul wanaagsan, rumaysadkaagu waa meyd! Ha dhihin waxaan ahay qof Ilaah, haddii noloshaada aan lagu arag wax arrinkaas tilmaamaya. Ha dhihin, Masiixa ayaa igu dhex jira, oo waa Badbaadi-yahayga, haddii uusan kuu samayn sheey lagu arkayo noloshaada, oo taas ka markhaati kaca.

Markaas rumaysadkaagu waa mid aan jirin, oo meyd ah, haddii kale waxaa noloshaada laga arki lahaa kororsiimo. Waxyaabo runta ka fog, ayaa mararka qaar u muuqanaya wax dhab ah—sida ubaxyada macmalka ah ama dhalanteed ah. Mararka qaar ubaxyada dhabta ah iyo kuwa macmalka ah lama kala garto ilaa aad soo taabato. Waxaa loo ekaysiinayaa kuwo dhab ah.

Waxaan markaas idinku leeyahay midba kan kale ha la shaqeeyo, oo ifahma wax walibana si daacad ah u sameeya. Balse ha kala tegina, oo is imtixaama oo arka sida aad wax u samaynaysaan inay tahay wax ku salaysan Qorniinka.

Is-weyddiiya idinkoo leh, **“Miyaa nalagu tilmaami karaa dad masiixiyiin ah?”** Mise dhihi karnaa waxaannu nahay muuminiin Ilaah oo xagga afka ah, mmise sida dadkii Ilaah ayaannu u nool nahay ficil ahaan iyo akhlaaq ahaanba?” Haddaba aynu Ilaah isugu dhiibno si dhammaystiran oo aan naaqus lahayn.

Wuxuu inaga buuxinayaa ruuxiisa, waxaanan maamulka naloshayada u dhiibaynaa Ilaah. Wuxuu inagu barakadayn doonaa waxyaalo waaweyn ee uu Isagu ku ammaani doono.

SONG: REEL—CUT---

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale) Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060